# Dib U Helitaanka Hantidaada Ka Dib Marka Aad Guurto


Getting Property Back After You Move Out

## Alaabtii aan uga guuray gurigii hore dib ma u heli karaa?

Haddii guriga lagaa saaro oo alaabada aad uga tagto, waxaa jira sharciyo u gaar ah oo hagaya talaabooyinka uu kireeyuhu qaadi karo. Kireeyuhu alaabada wadada kuma tuuri karo.

## Haddii ay alaabadaadu weli dhex talalo gurigii aad deganeyd

Sharciyada soo socda waxa ay khuseeyaan haddii aad alaab uga tagtay guriga aad ka guurtay. **Ma kala duwana haddii amar maxkamadeed lagaaga saaray iyo haddii kale**, ama haddii kireeyuhu ku amray in aad ka guurto ama aad adigu go'aansatay in aad ka guurto.



- **Waa in kireeyuhu alaabada ku siiyaa 24 saac gudahood** ka dib marka aad weydiisato in lagu siiyo. Waa in aad qoraal ku weydiisataa. Waxa aad ku weydiisan kartaa fariimaha telefoonka, iimeylka ama warqad qoraal ah. Waqtiga ay ku eg tahay kuma jiraan fasaxa todobaadka iyo ciidaha. Codsigaaga qoraal ahaan ku soo gudbi oo nuqul (koobi) ka reebo.. Waxaa laga yaabaa in aad ku diri karto warqad ka diiwaan gashan boostada oo aad markhaati goobjoog ah u yeeri marka aad siineyso. Waa in aad la socodsiisaa kireeyaha in aad ku qortay taariikhda iyo saacadda aad dooneyso in aad alaabada laguu soo celiyo.

- **28 cisho ka dib, waxa uu kireeyuhu iibin karaa ama tuuri karaa alaabadaada.** Waa in kireeyuhu ku siiyaa ogeysiis oo qoraal ah 14 cisho ka hor inta aanu iibin alaabada. Haddii uusan ku siin ogeysiiska, waa in ay kuugu soo diraan cinwaanka ugu dambeeyey ee kuu qoran kuna dhajiyaan ogeysiiska guriga muddo 2 todobaad ah.

  Haddii uu kireeyuhu tuuro alaabadaada halkii ay iibin lahaayeen, in ay ogeysiis ku siiyaan lagama doonayo. Laakiin waa in ay weli sugaan 28 cisho ka horinta aanay tuurin.

- **Haddii alaabada ay ku xareysan yihiin dhismaha, lagaama doonayo in aad bixiso wax lacag ah si aad u hesho**. Kireeyaha alaabada iskama heysan karo ilaa aad bixiso kirada ama lacagaha kale. Laakiin waxa uu kireeyuhu codsan karaa in lacag lagaa siiyo waqtiga ka galay raritaanka alaabadaada iyo kharashka bakhaarka la dhigay.


- **Haddii guriga lagaa saaro, waxa kireeyaha laga doonayaa inuu qoro liiska alaabada inta ay ciidanka nabadgelyadu halkaas joogaan.** Liiskan waa in lagu sheegaa xaaladda shay kasta. Waa in lagu qoraa magaca iyo lambarka askariga sherrifka ka tirsan ee goobjoogga ahaa. Adiga iyo sherrifka waa in aad nuqul (koobi) koobi ka qaadataan.

## Haddii hantidaada la dhigay meel kale oo uusan JIRIN amar Maxkamadeed Oo Lagaaga Saaray Guriga

Waa in kireeyuhu raacaa sharciyo la mid ah kuwa kor ku xusan LAAKIIN 48 saacadood gudahood (halkii ay ka ahaan laheyd) inuu alaabada dib kuugu soo celiyo.

## Haddii hantidaada la dhigay meel kale oo uusan JIRIN amar Maxkamadeed Oo Lagaaga Saaray Guriga

- **Waa in kireeyuhu alaabada ku siiyaa 48 saac gudahood** ka dib marka aad weydiisato in lagu siiyo. Waa in aad qoraal ku weydiisataa. Waqtiga ay ku eg tahay kuma jiraan fasaxa todobaadka iyo ciidaha. Codsigaaga qoraal ahaan ku soo gudbi oo nuqul (koobi) ka reebo.. Waxaa laga yaabaa in aad ku diri karto warqad ka diiwaaan gashan boostada oo aad markhaati goobjoog ah u yeer marka aad siineyso.



- **Mulkiiluhu waa inuu daryeelaa alaabadaada muddo 60 maalmood ah.** Intaas ka dib kireeyuhu wuu iibin karaa alaabadaada. Waa in ay ku siiyaan 3 todobaad oo ogeysiis ah. Haddii aan ogeysiiska gacanta lagaa saarin, waa in ay kuugu soo diraan cinwaanka ugu dambeeyey ee kuu qoran, ku daabacaan wargeyska, kuna dhajiyaan ogeysiiska muddo 3 todobaad ah goob dadweynaha u furan.

- **Waa in aad kireeyaha dib ugu celisaa kharashka raridda iyo bakhaar dhigidda alaabada haddii amar maxkamadeed lagaaga saaray guriga oo ciidanka nabadgelyadu kaa saaray.** Tani waa haddii alaabtaada laga qaday dhismaha aad daganeyd oo la geeyey meel kale. Kireeyuhu waxa uu codsan karaa in aad bixiso lacagta ka hor inta aan hantidaada laguu soo celin. Kharashkaas waa inuu noqdaa mid macquul ah.

## Maxaa yeelaya haddii kiro ama kharash kale la igu leeyahay?

**Waad codsan kartaa in alaabadaada laguu soo celiyo haddii uu kireeyuhu kugu leeyahay lacag** markii aad deganeyd guriga sida kirada, kharash kale, ama kharashka maxkamadda. Kireeyaha waxa uu ku weydiisan karaa lacagtiisa laakiin uma heysan karo alaabadaada lacagta oo aadan bixin darteed.

**Kireeyuhu waxa uu lacagta alaabada lagu iibiyo u isticaali karaa kharashka raridda iyo bakhaarka iyo deynta kale ee uu kugu lahaa.** Waad weydiisan kartaa in lagu siiyo lacagta ka soo harta. U qor waraaq aad ku codsaneyso in laguu soo diro lacagta soo harta. Nuqul (koobi) ka reebo.

## Ma dacweyn kartaa.

Haddii aanu kireeyuhu kuu soo celin alaabada, waxa aad ka dacweyn kartaa Maxkamadda Madaniga ah. Waxaa lagaa doonayo inaad keento cadeyn dhamaan hantida uu kireeyuhu hayo iyo kharashka aad gashay si aad alaabadaas oo kale iyo alaabada aadan bedeli karin sida daawada iyo qalabka shaqada.

Waxaa kale oo aad codsan kartaa kharashka qareenka iyo ganaax laba laab ah oo mgadhaw ah ama $1,000 hadba kii badan. Akhri xogta ururusan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga*. Haddii uu kireeyuhu lacag kugu leeyahay, waxaa suurogal ah in kireeyuhu soo gudbin karo dacwad liddi ku ah taada.

Haddii guriga lagaaga saaray amar maxkamadeed oo ka soo baxay DegmadaHennein ama Ramsey, dib ugu noqo Maxkamadda Guryaha isla dawcaddaas, intii aad dacwad kafuri laheyd Maxkamadda Madaniga.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan ururrsan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**